

Waa maxay  
**masuuliyada**  
iga saaran  
guryaha  
dadweynaha ee  
MDHA?

- Dib u xaqiiji sanad kasta iyo mar kasta oo tirada qoyskaaga ama dakhligaagu is beddelo. Maareeyaha gurigaaga sii caddaynta dakhliga qoyskaaga .
- Bixi kiradaada bil kasta. U sheeg maareeyaha gurigaaga haddii dakhligaagu isbeddelo - waxay saamayn kartaa kiradaada!
- Saxiix ogolaanshaha loo baahan yahay iyo foomamka xaqiijinta.
- Ha jabin heshiiskaaga ama ha u hanjabin/ wax khatar ah ha sameyn. Tan waxaa ku jira martidaada.
- **Qoraal** ku ogeysii mulkiilahaaga dayactirka lagama maarmaanka ah isla markaaba.

Goorma ayay  
MDHA isku dayi  
kartaa inay  
**guriga iga**  
**saarto?**

MDHA waxa ay kaliya ku saari kartaa ama ay dooran kartaa in aanay dib u cusboonaysiin heshiiskaaga **sabab (sababo gaar ah dartood)** tusaale ahaan, waxa aad waayi kartaa gurigaaga haddii aad:

- ka waramin isbeddelka dakhligaaga, ama u sheegin mulkiilaha dadka kula nool.
- kirada bixin ama si isdaba joog ah ayaad uga daahday bixinta kirada.
- kadhigtid meesha mid aan caafimaad qabin ama aan ammaan ahayn..
- hanjabtid/sameeyso wax khatar ah ama sharci darro ah.

Maxaa  
dhacaya  
haddii MDHA  
ay isku daydo  
inay iga **saarto**  
**gurigeyga?**

- Waxaad helayaa ogeysiis **14 maalmood** ah oo aad ku bixinayso **haddii aadan bixin kirada.**
- Waxaad helayaa ogaysiis **30 maalmood** ah si aad u xalliso **dhib kasta oo kale.** Waxaad codsan kartaa inaad la kulanto mulkiilaha 30 maalmood gudahood si aad u xalliso dhibaataada.
- Haddii aadan kirada ku bixin 14 maalmood ama aad dhibaataada ku xalliso 30 maalmood gudahood, **waxaad heli doontaa waraaqo maxkamadeed.**

**Haddii lagugu eedeeyo fal dambiyeed ama aad u hanjabtay dadka kale, adiga waxaa laga yaabaa in lagusiyo ogeysiis gaaban oo aad awoodin inaad codsato kulan.**

Haddii aad hesho waraaqo maxkamadeed, aad **MAXKAMADDA!** Haddii aadan samayn, si toos ah ayaad u guul daaresani doontaa.

**Waa maxay xuquuqaha kale ee aan ku leeyahay guryaha dadweynaha ee MDHA?**

Khidmadaada daahitaanku marnaba kama **badnaan karto 10% kiradaada.** Kharashyada daahida qaarkood kama **badnaan karaan \$10.** Hubi heshiiskaaga!

Laguma saari **karo** lacag daasan awgeed.

Maareeyaha gurigu waa inuu ku sameeyaa **dayactirka lagama maarmaanka** ah waqti macquul ah.

Maareeyaha gurigu waa inuu **meelaha la wadaago & tas-hiilaadka** ammaan iyo nadiif kadhigo.